

Ku soo dhawaw dugsiiga sar-sare ee Norrköping

Waan ku salaannay waxaanna rabnaa in aan si diirran xilli dugsiyeed iyo sanad dugsiyeed cusub kuugu soo dhaweyneynaa dugsiiga sare. Waxaan sidoo kale rabnaa in aan idin xusuusinno in uu weli jiryo cudur aaf ah, halkaas oo ay dhammaan mas'uuliyad naga saarantahay in aan faafitaankiisa yareyno. Macluumaadkan wuxuu ku saabsanyahay sii socoshada ruutiinka dugsiiga sare ee ku aaddan Covid-19, wuxuuna ku jeedyaa adigaaga ardayga ah iyo waalidka.

Si ka duwan xilli dugsiyeedki guga wey furanyihiin dugsiyada sare ee Norrköping, hawlahoodi caadiga ahaa ayaana mar kale ka socda. In xaaladda iminka taagan la waafajiyo hawluhu wey dhici kartaa, waana wax horay loo sameeyay si loo raaco talooyinka xukuumadda Hey'adda caafimaadka bulshada. Dhammaan goobaha shaqada ee degmadu si joogto ah ayey mar walba uga warheynayaan xaaladda markaas taagan.

Si wada jir ah waan u yareyn karnaa faafitaanka cudurka, waxaan u baahannahay in aan qaadanno mas'uuliyad wadajir ah, waxaanna u baahannahay caawimaaddaada.

Sidan ayaad ugu fogaaneysaa in uu cudurku faafo

- **In badan si fiican gacmaha ugu dhaq saabuun iyo biyo.**
- **Guriga jooga haddii aad xanuunsantihid**
Waa muhiim in aad iskoolka ka joogtid haddii aad xanuunsantihid ood aad leedihiid calaamado cudur sida tusaale ahaan diif, qufac ama feebaro. Taasi xitaa wey khuseysaa calaamado cudur oo khafiif ah. Waa muhiim in aadan dadka kale cudurka qaadsiiin. Waxay sidoo kale taasi ka dhigantahay in ay khasab tahay in ardayda leh calaamado cudur aan guriga u dirno. Waxay taasi khuseysaa dhammaan nooc walba oo ka mid ah cudurrada. Ardayda xanuunsan waa in ay guriga joogaan ilaa ay ka caafimaadaan iyo laba maalin oo dheeraad ah oo aysan lahayn calaamado cudur.

- **Ku qufac ama ku hindhis laabatada xusulka**
- **Dadka kale masafo u jirno, iskana ilaali in aad cid gacan qaaddid ama hab siisid**
Waxay taasi intii suurta gal ah ka shaqeyneysaa sida aan waxbarashada nidaamineyno, laakin waa in guud ahaan iskoolka gudihiisa la isu jirsado masafo ilaa heer ah.

Waxbaad caawin kartaa adigoo iskoolka ku aadaya si kale oo aan ahayn in aad bas raacdid ama tareenka magaalada dhex mara

- Arday badani waxay maanta iskoolka u raacaan gaadiid dadweyne. Laakinse waxaan rabnaa in aan adigaaga si kale iskoolka ku tegi kara kugu boorrinno in aad sidaas kale ku tagtid – u lugey, baaskiil u raac ama si kale dooro haddii ay suurta gal kuu tahay.
- Haddii ay khasab tahay in aad gaadiid dadweyne raacdid waxaa aad muhiim u ah in aad tixgelin siisid oo aad masafo u jirsatid musaafiriinta kale. Taasi waxay shaqeyneysaa gadiidka dushiisa iyo marka maxaddada la joogo, iyo sidoo kale marka aad gaadiidka raaceysid ama ka degeysid. Inta aadan raacin gaadiidka u oggolaw kuwa degaya in ay ka degaan.
- Waqti fiican gurigaaga ka soo bax haddii ay khasab tahay in aad raacdid gaadiid dadweyne.

Distans wax ku dhigidda dugsiga sare

- Dugsiyada sare ee Norrköping waa ay furanyihiin, waxbarashaduna iskoolka ayey ka dhaceysaa. Haddii aad fayawdihid waa in aad iskoolka aaddaa oo aad waxbarashada ku qaadataa, waxna laguugu dhigo.
- Wey dhici kartaa in wax-wax yar distans lagu dhigo xitaa inta deyrta lagu jiro haddii qaabka waxbarashada iyo waxa ay ka koobantahay ay ku habboonyihiin in distans lagu dhigo.
- Maamuluhu go'aan ayuu ka gaari kari karyaa xal ugu helidda ardayda khatarta si mid walba u gooni ah.

Iskool soo xaadiridda

- Waxaan rabnaa in dhammaan ardayda xanuunsan ama leh calaamado cudur oo khafiif ah ay guriga joogaan. Haddii aad fayawdihid waa in aad iskoolka timaadaa halkaas oo wax lagu dhigayo si aad waxbarasho u

heshid.

Wadahadalka horuumarka ardayga

- Iskool walba wuu sheegi doonyaa sida wadahalka horuumarka ardaygu uu deyrta u dhici doonyo.

Bogga norrkoping.se waxaa ku jira macluumaad ku aaddan feyruska corona, su'aalo iyo jawaabo iyo isku xirayaal kuu gudbinaya hey'adaha kale ee dowladda. Macluumaadka si joogto ah ayaa loo cusbooneysiisaa:

<https://www.norrkoping.se/information-om-coronaviruset>

Bogga norrkoping.se waxaa sidoo kale ku jira bog intarneet oo gaar ah oo kugu wajahan adigaaga dhallinta yar. Halkaas oo aan hal meel isugu ururrinay macluumaad la xiriira feyruska, si ay u fududaato in la helo. Halkaas waxaa ku jira macluumaad rasmi ah oo si fudud loo akhrin karo iyo talooyin ku aaddan sida uu qofku isu daryelayo haddii uu guriga joogyo oo uu leeyahay calaamado cudur oo khafiif ah, laakin saas oo ay tahay uu isku dayayo in uu waxbarashada la socdo. Fadlan booq bogga: [norrkoping.se/corona-information-till-unga](https://www.norrkoping.se/corona-information-till-unga)

Haddii aad qabtid su'aalo ama wax isweydiineysid ku soo dhawaw in aad la xiriirtid macallinka aad hoos timaadid ama maamulaha.

Salaan saaxibtinimo

Jonas Eriksson, madaxa hawlaha dugsiga sare
Claes Göransson, madaxa hawlaha dugsiga sare